



kama uu tagin malakul Jibriil inuu jaarka ii dardaarmayo, ilaa aan u maleeyey inay is dhaxlayaan

Waxaa laga wariyey Ibnu Cumar Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiiba inuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri: "kama uu tagin malakul Jibriil inuu jaarka ii dardaarmayo, ilaa aan u maleeyey inay is dhaxlayaan ".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Rasuulku scw wuxuu sheegay in malakul Jibriil uusan ka tagin inuu ku celceliyo oo uu amrayo jaarka ilaalintiisa, kaasoo ah guriga u dhaw, xataa haduu yahay muslim, gaal, qaraabo, ama shisheeye waa in la ilaaliyo xaqiisa oo aan la dhibin, waa in loo ixsaan falo oo lagu sabro dhibkiisa, ilaa uu u maleeyey Nabigu scw markuu arkay sida uu u wayn yahay xaq jaarku oo uu ugu celcelinaayo Jibriil ayuu u maleeyey in waxyi ku soo dagi doono in la siiyo xoolaha uu ka tagi doono markuu dhinto.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/4965>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

